

Isla ciyaara

Barashada wax kala qaybsiga, tooko qaadashada, wada xiriirka, si raaxo leh ku joogida iyo saxiib la noqoshada dadka kale waa xirfado noolosha oo dhan loo baahan yahay laakiin xoogaa waqtii ayuu ku qaadan karaa barashadooda! Wuxuu ilmahaada ku caawin kartaa inuu barto xirfadayaashaan muhiimka ah markii aad isla ciyaareysaan, ama markii aad u qaban-qaabiso inay la ciyaaraan saaxiibadooda ama xubinada kale ee qoyska, ha ahaado qof ahaan ama internetka ayadoo loo maraayo FaceTime ama WhatsApp.

Talada xiddigta

Dhammaan carruurta way kala duwan yihiin! Qaar way ka firfircoon yihiin kuwa kale - ha is-barbardhigin iyo ha ka welwelin - ilmahaada sii fiican ayaad u taqaanna sidaa awgeeda sii taageerida iyo dhirrigelinta ay u baahan yihiin.



Miyaad ogeed in barashada la ciyaaridda dadka kale uu muhiim u yahay horumarka shakhsiyeed, bulshadeed iyo shucuureed ee carruurta? Wuxuu xittaa ku caawiyyaa inay bartaan in dadka kale qabaan dareen iyo ra'yi midkooda ka duwan.



Talada xiddigta

Dhiirrigeli iyo shaki ka saar ilmahaada si aad u dhisto kalsoonidooda markii ay bilaabayaan inay yeeshaan saaxiibadooda.

Carruurta si kala duwan ayeey u ciyaaraan:

- Qaar keligooda ayeey ciyaaraan
- Qaar waxay daawadaan sida carruurta kale u ciyaaraan
- Qaar kale carruurta kale ayeey ku ag ciyaaraan; oo waxay sameeyaan isla wax-qabad laakiin kuma biiraan
- Waxay bilaabaan inay si ka badan u xiiseeyaan wixii ay carruurta kale ku ciyaaraan iyo waxay bilaabaan inay isla hadlaan.
- Isla ciyaaridda, caadi ahaan koox yar

